

Ka caawi ilmaha Inay Isku Dheeli tiraan Noloshooda Baraha Bulshada

Laga bilaabo taleefannada iyo taableedyada ilaa filimaanta la daawadu iyo YouTube ka, tignooloojiyada iyo saxaafada ayaa meel kasta laga helaa. Carruurta way jecel yihiin inay daawadaan filimaanta, ciyaaraha, iyo xogta. Waalidiinta iyo daryeelayaasha ayaa jecel inay carruurtoodu wax ka bartaan nolosha (ayna mashquulsanaadaan marka cashada la karinaayo). Laakiin waa wax fudud inay ku talax tagaan marka taleefanku u iska sharqamaayo sheekada xigtana ay si otomaatig ah u shidmayso. Qoysaska ayaa hubin kara adeegsiga saxaafada iyo tignooloojiyada ayagoo raacaaya dhawr xeeladood oo fudud.

Akhri 5 taan tilmaamood

1

Abuur waqtiyada iyo aagaga ka caagan shaashada.

Ka caawin carruurta inay ka nastaan taleefanada adoo ka xadidaaya shaashada qolalka jiifka, inta lagu jiro xiliga casharka, ama miiska cashada.

2

Iskuday xakamaynada waalidka.

U samee xadidaada waxyaabaha muhiimka u ah qoyskaaga. Adoo raacinaaya wada sheekaysi ku aadan dabeecadaha wanaagsan ee baraha interneedka, adeegso qaybaha sida miirayaasha walxaha, sitinada sirta, iyo xadiyada waqtiga ee ay baxshaan ababka iyo aaladaha qoyskaagu adeegsadaan si ay kaaga caawiyaan maaraynta isticmaalka iyo daawashada interneedka.

3

Deji xeerarka qoyska oo qeexan.

Isla go'aansada nooca baraha iyo tignooloojiyada haboon -- iyo xiliga ay haboon tahay in la adeegsado. Qorshaha warbaahinta ee qoyska ayaa ka caawin kara qof kasta inuu fahmo xeerka.

4

Wax isla daawada oo isla ciyaara.

Dooro baraha tayada leh, ee ku haboon da'da si aad ula ciyaarto ilmahaaga. Booqo commonsensemedia.org si aad u hesho filimaanta, ciyaaraha, iyo waxyaabaha kale.

5

Ka caawi ilmaha inay aqoonsadaan dabeecadaha caafimaadka qaba.

Bar ka hadalka dareemada -- jir ahaan iyo maskax ahaanba -- xiliyada ay shaashada daawanayaan iyo marka aysan daawanaynba.

